روح العمل الجماعي وضوابطه
Nuxurka wada shaqaynta iyo qaacidooyinka u degsan

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(وَقُلِ اعْمَلُواْ فَسَيَرَى اللّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ وَالْمُؤْمِنُونَ وَسَتُرَدُّونَ إِلَى عَالِمِ الْغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ)

(**Dheh: camalfala wuu arki doonaa Alle camalkiina iyo rasuulkiisa iyo mu'miniinta, waxaana la idin celinayaa midka og waxa maqan iyo waxa jooga wuxuuna idin sheegayaa waxaad samayn jirteen**), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa.

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Ummadaha laguma dhiso hadal iyo shicaaro, ee waxaa lagu dhisaa aqoon iyo siismo iyo huritaan, waxa ugu muhimsan dhisidda ummadaha iyo hormarkooda

waa shaqada dhabta ah oo si fiican loo sugay, Alle wuxuu leeyahay:

(وَقُلِ اعْمَلُواْ فَسَيَرَى اللّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ وَالْمُؤْمِنُونَ وَسَتُرَدُّونَ إِلَى عَالِمِ الْغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ)

(**Dheh: camalfala wuu arki doonaa Alle camalkiina iyo rasuulkiisa iyo mu'miniinta, waxaana la idin celinayaa midka og waxa maqan iyo waxa jooga wuxuuna idin sheegayaa waxaad samayn jirteen**), Nabigeenana - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(إِنّ اللهَ –عز وجل– يُحِبُّ إِذَا عَمِلَ أَحَدُكُمْ عَمَلًا أَنْ يُتْقِنَهُ)

(**Alle - *cazza wajalla* - wuxuu jecel yahay midkiina hadduu shaqo qabanayo inuu sugo**), diinta iyo wadaninimada wada jir ah waxay naga rabaan dadaal iyo dhidid iyo shaqo iyo wax soo saar, siiba diinteena waa diinta shaqada iyo sugitaanka.

Hadduu yahay shakhsiga midka ugu muhimsan dhismaha bulshada, kaalinta dhabta uu ka qaadanayo dhismahan ma dhammaystirmayso haddaysan bulshada inta kale la shaqaynin, aadanaha waa laga yaabaa inuu shaqada qayb ka qabto laakin marka fikirkiisa lagu biiriyo fikir kale, dadaalkiisana lagu biiriyo dadaal kale, waxaan shaki ku jirin wax qabadka inuu noqon doono mid aad u weyn waxtar badanna leh, sidaa awgeed islaamka wuxuu kor u qaaday shaqada loo wada dhan

yahay, wuxuuna ka dhigay waxyaalaha ugu muhimsan oo lagu dhiso dowladaha iyo xadaarooyinka, illeen waxaa ku sugan ka faa'idaysiga kartiyada iyo mideynta himmada iskaashiga sidii loo xaqiijin lahaa ujeeddooyinka dadka ka dhexeeya, taas dadka oo dhan ay wanaag ka helayaan, wuxuu leeyahay Alle:

(وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَى وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ)

(**Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambiga iyo colnimada**).

Qofka fiirfiiriya dhanbaalka Quraanka wuxuu ogaanayaa inay badan yihiin aayadaha ku boorriya faafinta nuxurka wada shaqaynta iyo in arrimaha loo guto sida hal koox oo kale, waxaa ka mid ah oraahda Alle - *subxaanahu* - makuu amrayay cibaadadiisa:

(يَا أَيُّهَا النَّاسُ اعْبُدُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ وَالَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ)

(**Dadow caabuda rabbigiina idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horreeyay, waxaadna mudan tihiin inaad dhowrsataan**), iyo arrinta salaadda oo ah shacaacirta diinta tan ugu weyn, wuxuu leeyahay – *subxaanahu* -:

(وَأَنْ أَقِيمُوا الصَّلَاةَ)

(**Salaaddana ooga**), waa qaab jamac ah, wuxuu leeyahay – *subxaanahu* -:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا ارْكَعُوا وَاسْجُدُوا وَاعْبُدُوا رَبَّكُمْ وَافْعَلُوا الْخَيْرَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ)

(**Kuwa (Xaqa) rumeeyow rukuuca oo sujuuda oo caabuda rabbigiina falana khayrka waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaane**), wuxuu leeyahay asoo nabigiisa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - la hadlayo:

(وَاصْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ وَلَا تَعْدُ عَيْنَاكَ عَنْهُمْ تُرِيدُ زِينَةَ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَلَا تُطِعْ مَنْ أَغْفَلْنَا قَلْبَهُ عَنْ ذِكْرِنَا وَاتَّبَعَ هَوَاهُ وَكَانَ أَمْرُهُ فُرُطًا)

(**Ee ku samirsii naftaada la jirka kuwa baryaya rabbigooda aroor iyo galabba, iyagoo doonaya wajigiisa, yeyna ka iilanin Indhahaagu xaggooda adoo doonaya quruxda nolosha adduunyo hana adeecin ruuxaan halmaansiinnay qalbigiisa xusiddeena oo raacay hawadiisa uuna ahaaday amarkiisu xadgudub**), wuxuu leeyahay - *subxaanahu* -:

(وَاعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُوا)

(**Qabsada Xarigga Ilaahay dhamaantiin hana kala tagina**)

Wuxuuna nooga digay kalatagga wuxuu yiri:

(وَأَطِيعُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَلَا تَنَازَعُوا فَتَفْشَلُوا وَتَذْهَبَ رِيحُكُمْ وَاصْبِرُوا إِنَّ اللَّهَ مَعَ الصَّابِرِينَ)

(**Allena adeeca iyo rasuulkiisa hana murmina ood fashilantaan uu tagana xooggiinnu samra Alle wuxuu la jiraa kuwa Samree**).

Waxaan shaki ku jirin in qabashada shaqada iyo gudashada shaqooyinka muhimka ah iyadoo wada jir loo sameynayo waxay xoojinaysaa kalgacalka iyo walaaltinnimada iyo is jacaylka bulshada, waxaa ku dhaboobeysa tilmaanta Alle uu bixiyay:

(وَإِنَّ هَذِهِ أُمَّتُكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً)

(**Tanna waa umaddiina oo ah hal ummad**), waxaana ku rumoobaya hadalka nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادِّهِمْ، وَتَرَاحُمِهِمْ، وَتَعَاطُفِهِمْ مَثَلُ الْجَسَدِ إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهَرِ وَالْحُمَّى)

(**Mu'miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashadooda isu dhimrintooda waa sida hal jir oo kale, marka xubin ay ka sheegato jirkoo dhan ayaa dareemaya dhafar iyo qandho**), Mar uu rabay nin oday ah inuu baro wiilashiisa midnimada qiimaha ay leedahay iyo inay tahay sababta awoodda lagu helo, iyo halista kalatagga iyo inuu u yahay sabab kala jabka iyo burburka, wuxuu keenay xirmo qoryo ah, wuxuu yiri: yaa awoodo inuu xirmadan hal ama labo dhufasho ku jabiyo, mid kaste wuxuu isku dayay inuu jabiyo, laakin

kuma guulaysanin, markaas ayuu kala furfuray ilmihiisa ayuu u qeybiyay wuxuu siiyay mid kaste hal qori wuxuu ku jabiyay hal dhufasho wuxuu yiri:

تأبى الرماح إذا اجتمعن تكسرًا * وإذا افترقن تكسرت أفرادًا**

Warmaha way diidaan hadday kulmaan jajabid

****

Hadday kala tagaanna hal hal ayay u jajabayaan

Wuxuu noo sameeyay Quraanka wax badan oo tusaalooyin fiican ah, oo ku boorrinaya wada shaqaynta, caddeynayana sidey ugu lahayd saameyn weyn xaqiijinta ujeeddooyinka waaweyn.

Waakanaa sayidkeena Ibraahin - *nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - markuu Ilaahay amray inuu dhiso kacbada sharfta leh, wuxuu aaday wiilkiisa Ismaaciil - *nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ku yiri**:** (**Ilaahay wuxuu i amray arrin**), wuxuu yiri: (**samee wixii rabbigaaga ku faray**), wuxuu yiri: (**ma igu caawinaysaa?**) wuxuu yiri: (**waan ku caawinayaa**), wuxuu yiri: (**Ilaahay wuxuu i amray inaan halkan ku dhiso guri**), markaas ayay tiirarka guriga kor u qaadeen, Ismaaciil - *nabageglyo korkiisa ha haatee* - wuxuu keenayay dhagxaanta, Ibraahiimna wuu dhisayay, waxay isla dhiseen guriga

ugu horreeyay dadka loo sameeyay, wuxuu ku waariyay quraanka kariimka mowqifkan weyn oraahda Alle:

(وَإِذْ يَرْفَعُ إِبْرَاهِيمُ الْقَوَاعِدَ مِنَ الْبَيْتِ وَإِسْمَاعِيلُ رَبَّنَا تَقَبَّلْ مِنَّا إِنَّكَ أَنْتَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ)

(**Xusuuso markuu kor yeelay Nabi Ibraahim tiirarka Kacbada iyo nabi Ismaaciil iyagoo leh rabbiyow naga aqbal adaa waxna maqla waxna oge**), suuratu Alkahf wuxuu rabbigeena nagaga sheekaynayaa tusaale aad u sarreeya ee iskaashiga iyo wada shaqeynta ku sugan qisada dulqarnayan, markuu u tagay boqorkan caadilka ah dad uuna garanaynin iyaguna aysan garanaynin, waxay ka dalbadeen kaalmo, wuu ka oggolaaday markay ka dalbadeen, laakin wuxuu shardi uga dhigay inay la shaqeeyaan, wuxuu la wadaagay shaqada, wuxuuna ka faa'idaystay awooddooda, dhammaantooda waxay ahaayeen hal gacan ilaa uu ku dhammaystirmo dhismahan weyn, kaasoo sabab u ahaa inay ka nabadgalaan dhibka Yaajuuj iyo Maajuuj, Alle wuxuu leeyahay asoo ka hadalaya:

(حَتَّى إِذَا بَلَغَ بَيْنَ السَّدَّيْنِ وَجَدَ مِنْ دُونِهِمَا قَوْمًا لَا يَكَادُونَ يَفْقَهُونَ قَوْلًا * قَالُوا يَا ذَا الْقَرْنَيْنِ إِنَّ يَأْجُوجَ وَمَأْجُوجَ مُفْسِدُونَ فِي الْأَرْضِ فَهَلْ نَجْعَلُ لَكَ خَرْجًا عَلَى أَنْ تَجْعَلَ بَيْنَنَا وَبَيْنَهُمْ سَدًّا * قَالَ

مَا مَكَّنِّي فِيهِ رَبِّي خَيْرٌ فَأَعِينُونِي بِقُوَّةٍ أَجْعَلْ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُمْ رَدْمًا * آتُونِي زُبَرَ الْحَدِيدِ حَتَّى إِذَا سَاوَى بَيْنَ الصَّدَفَيْنِ قَالَ انْفُخُوا حَتَّى إِذَا جَعَلَهُ نَارًا قَالَ آتُونِي أُفْرِغْ عَلَيْهِ قِطْرًا * فَمَا اسْطَاعُوا أَنْ يَظْهَرُوهُ وَمَا اسْتَطَاعُوا لَهُ نَقْبًا*)**

(**Markuu gaaray labada xirmo dhexdooda wuxuu ka helay hortooda dad aan garanayn hadal (af gaar ah ku hadlaya) * waxayna dheheen dul qarnaynow Yaajuuj iyo Maajuuj waxay fasaadin dhulka ee ma kuu yeellaa ujuuro inaad yeesho dhexdeena xireen * wuxuu yiri waxa uu i siiyay rabbigayga ayaa ka khayr badan ee igu caawiya xoog aan yeelo dhexdiinna xireen * i siiya gabal bir ah, markuu ekeeyay labada dhinac dhexdooda wuxuu yiri afuufa markuu ka yeelay dabna wuxuu yiri i siiya aan ku shubee maar la dhalaaliyay * mana karayaan inay ka soo kor baxaan (ka soo dhacaan) mana karayaan inay duleeliyaan ***), Kanna waa kii Alle la hadlay Muuse - *nabadgelyo korkiisa ha haatee* - wuxuu weyddiinayaa Alle - *cazza wa jalla* - inuu ku xoojiyo walaalkiisa Haaruun - *nabadgelyo korkiisa ha haatee* - , siduu ugu noqdo garab iyo gargaar arrinta ilaahay u dhiibay, wuxuu leeyahay Alle asoo ka hadlaya:

(قَالَ رَبِّ اشْرَحْ لِي صَدْرِي * وَيَسِّرْ لِي أَمْرِي * وَاحْلُلْ عُقْدَةً مِنْ لِسَانِي * يَفْقَهُوا قَوْلِي * وَاجْعَلْ لِي وَزِيرًا مِنْ أَهْلِي * هَارُونَ أَخِي * اشْدُدْ بِهِ أَزْرِي * وَأَشْرِكْهُ فِي أَمْرِي * كَيْ نُسَبِّحَكَ كَثِيرًا * وَنَذْكُرَكَ كَثِيرًا *إِنَّكَ كُنْتَ بِنَا بَصِيرًا)

(**Wuxuu yiri (Muuse) Rabbiyow ii waasici laabtayda * iina fududee amarkayga * kana fur guntinta carrabkayga * ha kaseen hadalkeygee * iina yeel wasiir ehelkeyga ah * Haaruun walaalkayga * kuna adkee tabartayda * lana wadaaji amarkayga * inaan kugu tasbiixsanno wax badan * oon ku xusno wax badan * adugu waxaad tahay mid na arkee**).

Sidoo kale qofka fiirfiirinaya siirada nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - ee suuban wuxuu ku arkaa safxado ifaya ee iskaashi iyo isbahaysi iyo wada shaqayn nolosha nabiga iyo asxaabtiisa, wuxuu leeyahay sayidkeena Cusmaan bin Cafaan Caazib - *Ilaahay raalli haka noqdee* -: (annaga wallaahi waxaan la saaxiibnay rasuulka Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - socdaal iyo deganaanba wuxuuna nala wadaagi jiray wax yar iyo wax weynba sidaas oo kale wuxuu nabiga la wadaagi jiray shaqada iyo dhismaha, wuxuu ku boorrin jiray inay isku duubnaadaan oo ayna kala tagin, maalinta Khandaq wuxuu leeyahay Albaraa bin Caazib - *Ilaahay raalli haka noqdee* - waxaan arkay rasuulka Ilaahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha*

ahaatee - maalinta Axzaab asoo ciidda qaadaya ayadoo ciidda caddaanta calooshiisa qarisay isagoo dhahaya:

(اللهم لَوْلاَ أَنْتَ مَا اهْتَدَيْنَا ، وَلاَ تَصَدَّقْنَا وَلاَ صَلَّيْنَا ، فَأَنْزِلَنْ سَكِينَةً عَلَيْنَا، وَثَبِّتِ الأَقْدَامَ إِنْ لاَقَيْنَا ، إِنَّ الأُلَى قَدْ بَغَوْا عَلَيْنَا ، وإِذَا أَرَادُوا فِتْنَةً أَبَيْنَا)

(**Ilaahayow haddaadan adiga ahayn ma aanan hanuuni lahayn ma aanan sadaqaysan lahayn ma aanan tukan lahayn, nagu soo deji xasillooni, cagaheenana noo sug markaan la kulanno (cadowga) way nagu xadgudbeen hadday fidno rabaanna waan diidnay**).

Markuu doonay Sayidkeena Salmaan Alfaarisi – *Ilaahay raalli haka noqdee* - inuu beero seddex boqol geed timireed si naftiisa uu u xoreeyo, wuxuu ku yiri rasuulka Alle asxaabtiisa: (**u kaalmeeya walaalkiina, Salmaan**), wuxuu yiri: waxay igu kaalmeeyeen geed timireed, ninka wuxuu keenayay soddon tallaal ninna wuxuu keenayay labaatan ninna shan iyo toban ninna wuxuu keenayay intuu awoodo ilaa ay ii aruuraan seddex boqol tallaal, wuxuu i amray rasuulka Alle inaan qodo wuxuu yiri: (**markaad dhammeyso ii imow, anaa gacantayda ku tallaalayee**), wuxuu yiri: waan qoday saaxiibayaashayda ayaa igu caawiyay, markaan dhammeeyay waan u imid waan u sheegay, rasuulka -

naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuu isoo raacay, geed timireedka ayaan u dhoweynayaa gacantiisuu ku tallaalayaa.

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - si fiican ayuu u ammaanay Ashcariyiinta markay isla wadaagayeen shaqada iyo dhaqanka iyo wax wada qabsiga iyagoo maraya duruufo adag, wuxuu leeyahay:

(إِنَّ الأَشْعَرِيِّينَ إِذَا أَرْمَلُوا فِي الغَزْوِ ، أَوْ قَلَّ طَعَامُ عِيَالِهِمْ بِالْمَدِينَةِ جَمَعُوا مَا كَانَ عِنْدَهُمْ فِي ثَوْبٍ وَاحِدٍ ، ثُمَّ اقْتَسَمُوهُ بَيْنَهُمْ فِي إِنَاءٍ وَاحِدٍ بِالسَّوِيَّةِ ، فَهُمْ مِنِّي وَأَنَا مِنْهُمْ)

(**Ashcariyiinta marka ay hantidooda ku yaraato waqtiga duullaanka, ama cuntada caruurtooda ku yaraato oo ku sugan magaalada, hal maro ayay kusoo shubaan waxa ay haystaan, kaddib hal weel ayay ugu qeybsadaan si isla eg, iyaga aniga ayay iga mid yihiin, anigana iyagaan ka mid ahay**).

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Wada shaqaynta aan raadinayno waa shaqada wax dhisayso oo aan wax duminin, midda wax isku keenta oo aan wax kala geynin, waa shaqada ku salaysan asaas jideysan, sida is garabqabashada bulshada si aan looga helin qof gaajaysan ama dhibban, waa shaqada ku dhisan asaas tarbiyo iyo cilmi, sida isbahaysiga culimada xagga cilibaarista oo kale, iyo ardayda xagga waxqabadkooda waxbarasho iyo wax soo saar, ama ku dhisan asaas wadani, si loogu shaqeeyo hormarinta dalka dhinac walba.

Shaqada ma aha midda ku dhisan fikradaha wax dumiya oo ku kulmaya dilka iyo burburka iyo daadinta dhiigga, iyo burburinta dalalka iyo in la daciifiyo ama la rido, fikradahaas oo ku dhisan been iyo masabbidaad, iyo

rogidda xaqiiqada, mana ka yaraystaan diin ama dal ama damiir

Wada shaqaynta aan raadinayno waa shaqada wax dhista, diinta iyo dalka iyo dadkana dan ugu jirto, wayna isku xiran yihiin makala hari karaan, maxaa inooga baahi badan inaan ku sugno nuxurkan maskaxda ubadkeena, oo aan u baddalno manhaj nololeed oo ay ku noolaanayaan markaas jacaylka iyo isfahanka sidaas ugu dhex faafo dadka isku bulsho ah, ummaddeenana aan geyno meel ku habboon dhinac kaste.

Waxaan adkeynaynaa shacabka marka uu wada shaqeeyo inuu xaqiijin karo wax suurtagal aan ahayn, waxaa daliil u ah tijaabada iyo taariikhda hadda iyo waqti horeba.

Ilaahayow ammaan nagu sii dalalkeena, kuna toosi madaxdeena diintaada, kana ilaali dalkeena dhagarta dadka wax dhagra iyo fasahaadka kuwa wax fasahaadiya.